KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmahi

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad    Mugdishu, 3 Nofembre 1974    L. 11/ku celin

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 39/ku-celin, Tr. 2 Oktoobar 1974 — *Beddelaad Xeer iyo Kordhin.*

## BOGGA LABAAD

### XEER

W. M.

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYNI, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

SHARCI L. 39 Bis.
Beddelad Xeer iyo Korwhin.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKAAN ARKAY Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;
MARKAAN ARKAY Sharciga Lamb. 1 ee 21 Oktoobar 1969;

HADDAAN TIXGELIYAY Soo jeedinta Xoghayaha Wasaaradda Gaashaandhigga ee khuseeyneysa dhaqangelinta Sharciga tiradiisu tahay 39 ee 1da Oktoobar 1974 ee wax ka beddelaya, kordhinayayna X.C.C.N.;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'oaanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghaayayaasha Dowladda;

G O' A A N

Qodobka 1aad

Dembiyada ku xusan Sharciga tiradiisu tahay 39 ee 1dii Oktoobar 1974 ee aan weli la qaadin ee waqti kasta la galay waxaa lagu qaadayaa isla Sharcigaa.

Qodobka 2aad

Sharcigaan wuxuu ku soo baxayaa faafinta rasmiga ah. wuxuuna dhaqangolayaa markii la saxiixo.

Mugdisho, 2ddi Oktoobar 1974.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

## SAXID QALAD

**(Errata Corrige)**

Sharciga lamb. 39 tr. 1 Oktoobar 1974 oo ku saabsanaa «Beddelaad Xeer iyo kordhin», oo lagu qoray Faafinta Rasmiga lamb. 11 taarikh 1 nofembre 1974 bogga lamb. 501, waxaa qalad ahaan la qorin erayada hoos ku qoran (intaanan la qorin ereyga GO'AAN):

«ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghaayayaasha Dowladda».